Geediga Dhijitalka Tilifeeshankaaga

Kay-bulka iyo Satalayt-ka Sanduuqa isku-bedelka

Su'aalo Guud

## Geediga Dhijitalka

## Muxuu yahay geediga dhijital TV-gu (DTV)?

Ka guurista analooga ee loo guurayo baahinta tilifeeshanka dhijitalka ah ay loo bixiyey geediga tilifeeshanka dhijitalka ah ama (DTV). Sannadkii 1996-kii ayaa koongareeska maraykanku ku amray xarumaha TV-yadda inay sii daayaan baahin dheeri ah si ay u bilaabaan baahinta janal dhijital ah iyagoo isla markaana sii waddaya baahintooda analoga ah. Mar dambe, ayaa Koongareeska maraykanku amray in February 17, 2009 ay tahay maalinta u dambaysa ee tilifeeshanadu ay ku baxaan analog. Xarumaha idaacadaha ee dhamaan suuqyada maraykanku waxay imika ku baxaan analoog iyo dhijital labadaba. Wixii ka dambeeya February 17, 2009 waxay ku bixi doonaan oo kaliya dhijital.

*Ku noqo su'aalihii*

### Maxaynu uugu guuraynaa DTV-ga?

Faa'iido muhim ah oo laga helayo u guurista warbaahin ku shaqaynaysa dhijital ayaa ah inay qaybo wax-ku-ool ah oo warbaahinta ahi u madax banaan doonto wargelinta badbaadsanaanta dadwaynaha (sida boliiska, dab-damiska, iyo kooxaha wax badbaadiya). Siddoo kale qaybo ka mid ah noocyadan warbaahinta ayaa laga xaraashi doonaa shirkado awood u leh inay macaamiisha siiyaan adeegyo horumarsan oo aan waayir ku shaqaynayn (sida mawjado waayir aan ku shaqayn)

Siddoo kale macaamiisha laftooda ayaa ka faa'iidaya warbaahinta dhijitalka ah maxaa yeelay waxay u saamaxaysaa idaacadaha inay sii daayaan muuqaalo iyo cod tayo leh, dhijitalkuna sidiisaba wuu ka waxtar badan yahay analooga. Tusaale ahaan, halkii uu hal barnaamij oo analog ah ay ka sii dayn lahaayeen, waxaa idaacada u sahlanaanaysa inay sii daayaan dhowr barnaamij oo ah "haay dhifineeshan-High defination" ama dhowr ah "istaandadh dhifineeshan-standard defination" kuwaas oo mar kaliya la sii daayo iyaddoo la adeegsanayo hab la yidhaa "Maltikastin-Multicasting". Habkan maltikastin-ku wuxuu u ogolaanayaa idaacaduhu inay sii daayaan dhowr barnaamij oo dhijital ah isla waqti isku mid ah, iyagoo isticmaalaya intii uu u baahnaa hal barnaamij oo analog ahi. Siddaa darteed, tusaale ahaan, haddii idaacadi janal 7 ku sii daynayso analoog waxa kaliya oo ay awood u leedahay inay daawadayaasha u tebiso hal barnaamij, idaacada janal 7 ku sii daysa dhijital waxay awood u yeelanaysaa inay daawadayaasha u sii dayso dhowr barnaamij oo midi ka baxo janal 7-1, ku labaad oo dhijital ahna ka baxo janal 7-2, ku saddexaad-na ka baxo janal 7-3, sidaa u wadd. Tan macnaheedu waxaa weeyi daawadayaasha oo helay barnaamijyo ay kala doortaan.

*Ku noqo su'aalihii*

### Maxaan u baahan nahay si aan ugu diyaar garoobo dhamaadka baahinta TV-ga analooga (Analog)?

Madaama koongareesku amray in maalinta u dambaysa ee TV-yaddu ku baxayaan analoog ay noqoto February 17, 2009, TV-yadda hawadda ku jiraa ee wixii taariikhdaa ka dambeeyaa waxay noqon doonaan dhijital.Haddii aad haysato mid ama wax ka badan oo ah tilifeeshan kaas oo barnaamijyada ka soo qabta hawada isagoo isticmaalaya (anteenadda saqafka ama TV-ga la dul saaro), TV-ga aad haysato noociisa ayaa muhim ah. TV-ga dhijitalka ah (mid leh tuyuunar/tuner dhijital ah oo gudaha ku jira) wuxuu kuu saamixi doonaa inaad barnaamijyadda hawad ka soo leexsato wixii ka dambeeya February 17, 2009. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad haysato tilifeeshan analoog ah, waxaad u baahan doontaa sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga

si aad ugu sii daawan karto idaacadaha. Sanduuqan isku-bedelku waxa kale oo uu kuu ogolaan doonaa inaad fiirsato barnaamijyadda kale ee idaacadaha maxalliga ahi sii daynayaan.

Si loo caawiyo dadwaynaha inta lagu gudo jiro geedigan DTV-ga, dawladu waxay abuurtay barnaamijka waraaqaha qiimo-dhimista ee sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analooga. Hay'adda Qaranka ee Wararka iyo War isgaadhsiinta (National Telecommunications and Information Administration (NTIA)), oo qayb ka ah Waaxda Ganacsiga, ayaa maamulaysa barnaamijkan. Qoys kasta oo maraykan ah way u furan tahay inuu helo ilaa laba waraaqo-qiimo-dhimisood oo kuu aadan iibsiga sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analooga, oo midkiiba u dhigmo $40. Bilowga bisha January ee sannadka 2008, NTIA waaxay bilaabi doontaa qabashada codsiyadda qiimo-dhimista. Waraaqaha qiimo dhimista waxaa loo isticmaali karaa sanduuq-yadda isku-bedelka ay iibinayaan tukaanada elektorooniga ee ka qaybta ah barnaamijka, waraaqda qiimo dhimista waxaa la isticmaali karaa waqtiga wax iibsiga. (Fadlan ogow in waraaqaha qiimaha dhimistu ay dhacayaan 90 maalmood ka dib marka boosta lagu diro). Shirkadaha soo saara sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analoogu waxay qiimahooda ku qiyaaseen $40 ilaa $70 xabadiiba. Waa qiime mar kaliya ah. Wixii faahfaahin dheeri ah ee ku sahabsan barnaamijka qiimo-dhimista sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga, waxaad booqataa **www.dtv2009.gov**, ama wac tilifoonka lambarkiisu yahay 1-888-388-2009 (cod) ama 1-877-530-2634 (TTY).

Dadka isticmaala TV-ga kay-bulka ah ama kan satalayt-ka ee analoogu ku xidhan yahay adeegooda kay-bulka ama satalaytka saamayn ku yeelan mayso taariikhda kama dambaysta ah ee February 17, 2009 ee loo qabtay warbaahinta ku shaqaysta analooga.

***Ku noqo su'aalihii***

**Ma khasab baa inaan sugo daawashadda DTV-ga wixii ka dambeeya February 17, 2009 ?**

Maya, imikaba waa la heli karaa tilifeeshanka dhijitalka ah. Haddii aad hawada ka daawato tilifeeshanka imika, waxaa suurtogal kuu ah inaad heli karto badh ama dhamaan signalada dhijitalka ah ee idaacadaha maxalliga ah waa haddii aad haysato risiifarka (receiver) DTV-ga.Waxaa laga yaabaa inaad barnaamijyada ah haay dhifinishanka (high defination) ama maltikaaska (multicast) ka daawan karto idaacadaha TV-yada ee maxalliga ah. Hubso liiska barnaamij-yadda ee maxalliga ah ama wac tilifoonkan 1-888-225-5322 (TTY: 1-888-835-5322)

***Ku noqo su'aalihii***

**Dib ma loo riixi karaa taariikhada February 17, 2009 ee kama dambaysta baahinta tilifeeshanka ful baawarka ah ee analooga ah?**

Sharciga fedaaralku wuxuu jideeyay in February 17, 2009 ay tahay maalinta u dambaysa ee tilifeeshanadu ku baxaan habka analooga. Hay'adaha dawliga ah, ganacsiyadda, kooxaha danta dadwaynaha, iyo ururada kale ee danaynaya arrintan aad ayay u dedaalayaan siddii ay u hubsan lahaayeen in la xaqiijiyo waqtiga kama dambaysta ah iyo in qof walba u diyaargaroobo dhamaadka tilifeeshanada analooga ah.

***Ku noqo su'aalihii***

**Haddii aan haysto tilifeeshanadii hore ee analooga ahaa, ma in aan tuuro ayay noqonaysaa wixii ka dambeeya February 17, 2009 ?**

Maya. Sanduuq isku-bedela dhijitalka iyo analooga ayaa kuu ogolaan doona inaad sii isticmaasho TV-gaga analooga ah si aad uga fiirsato warbaahinta dhijitalka ah. Uma baahnid inaad ka takhalusto tilifeeshankaaga analooga ah. Waxaa intaa dheer tilifeeshanada analooga ah oo u sii shaqayn kara sidoodii haddii lagu xidhiidhiyo adeegyada la biishado sida kay-bulka ama satalaytka.Siddoo kale, tilifeeshanada analooga ah waxay ku sii shaqaynayayaan qalabka ciyaaraha (gaming console), VCR-da, DVD-yadda, iyo agabka kale ee aad imikaba ku isticmaasho.

***Ku noqo su'aalihii***

**Tilifeeshankaaga**

**Haddii aan doonayo TV cusub, ma khasab baa inaan iibsado nooca la yidhaa Haay dhifinishan TV (High Defination TV) ee magaciisa lagu soo gaabiyo (HDTV) si aan u daawado baahinta tilifeeshanka dhijitalka ah kadib geediga ?**

Maya.Waxaa muhiim ah in la fahmo in geediga DTV-gu yahay mid lagaga guurayo warbaahintii analooga ahayd looguna guurayo mid dhijital ah. Maaha geedi lagaga guuraya warbaahinta analooga ah oo loogu guurayo warbaahinta haay dhefinishanka ah (High definition). Warbaahinta dhijitalka ahi way is qaataan tan haay dhifinishanka ah, laakin haay dhifinishan loomama baahna, umana baahnid inaad gadato HDTV si aad u daawato TV-ga dhijitalka ah. Istaandad Dhifinishan DTV (oo aan wax kale ahayn'e ah TV gudaha ku leh dhijital tuyuunar], ama sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga oo ku xidhan TV analoog ah, weeyi waxa kaliya ee loo baahan yahay si loo sii wato daawashada warbaahinta tilifeeshanka. Noocyadan Istaandad Dhifinishanka (SD) ama Haay Dhifinishanka (HD) waxay ka mid yihiin warbaahinta tilifeeshanka dhijitalka ah. Barnaamijyadda ku baxa Haay Dhifinishan waxaad ku daawan kartaa DTV Istaandad Dhifinishan ah ama TV analoog ah oo ku xidhan sanduuqa isku bedela dhijitalka iyo analooga, laakiin yeelan mayso tayadii Haay Dhifinishanka. Waxaa kale oo xusid mudan in Istaandad Dhifinishan DTV-gu ay qiime ahaan u dhigmaan TV-yadda analooga ah ee ay isku xajmiga yihiin.

***Ku noqo su'aalihii***

**Siddee baan u hubsan karaa inaan gadanayo dhigital TV (DTV)?**

Sharciyan, bilowga March 1, 2007, dhamaan qalabka soo du'wa tilifeeshanka (ee ay ka mid yihiin TV-yadda, VCR-da, DVR-da, IWM] ee la keeno Maraykanka ama ganacsiga iskaga-gudba gobolada waa inuu uu ka mid yahay dhijital tuyuunar.Tukaanadu waa laga yaabaa inay sii wadaan iibinta qalab analoog oo kaliya ah ee ku hadhsan bakhaaradooda, balse waa inay ku muujiyaan qalabka analooga ah dushiisa ama agtiisa sumad Macmiisha Baraarujinaysa (Consumer Alert) oo ay ku qoran tahay ogaysiiskani:

## BARAARUJINTA MACMIISHA [ CONSUMER ALERT]

**Risiifarkani wuxuu leeyahay tuyuunar analoog ah oo kaliya waxaanu wixii ka dambeeya February 17, 2009, geediga Qaranka ee warbaahin dhijital ah awgeed, wuxuu u baahan doonaa sanduuqa isku-bedel oo leh anteeno si loogu daawado warbaahinta. TV-yada analooga oo kaliya ahi waxay sii waddi doonaan inay ku shaqeeyaan sidoodii hore marka ay noqoto ku isticmaalka kay-bulka iyo satalaytka, qalabka ciyaaraha, VCR-da, DVD-yada, iyo agabka la midka ah. Wixii war dheeri ah, wac Gudida Federaalka ee War isgaadhsiinta (Federal Communications Commission) oo lagala hadli karo tilifoonkan 1-888-225-5322 (TTY: 1-888-835-5322) ama booqo bogga tilifeeshanka dhijitalka ah ee guddida oo ah www.dtv.gov.**

Sidaa darteed, dhamaan qalabka tilifeeshan ee la gadayaa waa inuu ku jiro dhijital tuyuunar, ama waa in goobta wax kala iibsiga lagu ogaadaa inuusan la socon (sida ay sheegayso fariintu). Ka war hay summadan waxaanad ku baraarugsanaataa gol-daloolooyinka uu leeyahay qalabka analoog kaliya ku shaqeeya haddii aad iibsanayso TV cusub ama qalab kale TV-fii.

***Ku noqo su'aalihii***

**Siddee baan ku ogaan karaa inaan hore u sii haystay dhijital TV (DTV) iyo in kale?**

Qaar badan oo ka mid ah DTV-yadda iyo qalabka kale ee tilifeeshan dhijitalka ah waxay dusha ku leeyihiin summad ama calaamad, ama weedho ku jira macluumaadka la socda iyaga, si loo sheego in dhijital tuyuunar uu la socdo. Summadan ama calaamadahan waxaa laga yaabaa inay ka mid yihiin ereyadani "*Integrated Digital Tuner," "Digital Tuner Built-In," "Digital Receiver," ama "Digital Tuner," "DTV," "ATSC," or "HDTV" (High Definition television).*Haddii qalabkaaga tilifeeshanka uu ku qoran yahay mid ka mid ah sumadahaa ama calaamadaha, waxaa suurtogal kuu noqonaysa in aad barnaamijyada dhijitalka ku baxa daawan karto adiga oo aan u baahan sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga. (Xusuusnow, uma baahnid HDTV si aad u daawato barnaamijyo dhijital ah. Mar haddii qalabkaaga tilifeeshanku ka kooban yahay dhijital tuyuunarka,

waad daawan kartaa dhijitalka. HDTV-gu wuxuu daruuri noqonayaa kaliya haddii aad doonayso in barnaamijyada Haay dhifinishanka ku daawato tayaddooda ugu sareysa ee HD-ga ah.) Sidoo kale waa inaad hubisaa buuga la socda ama warbixin kasta oo kale oo la socota qalabkaaga TV-ga si aad u go'aamiso in dhijital tuyuunar la socdo iyo in kale.

Haddii tilifeeshankaaga ay ku suntan tahay "*Digital Monitor"* ama *"HDTV Monitor,"* ama sida *"Digital Ready*" ama*"HDTV Ready,"* tan macnaheedu maaha in dhijital tuyuunar la socdo. Sidaa awgeed, waxaad u dhowdahay inaad u baahato sanduuqa dusha la saaro oo gaar ah kaas oo uu ku jiro dhijital tuyuunar si aad u daawato barnaamijyada ku baxay dhijitalka.

Sanduuq-yada dusha ee dhijitalku ee " shaashadaha" HD-ga ah ama dhijitalka waxaa laga iibsan karaa bakhaarada tafaariiqda. Shirkadaha TV-ga Kay-bulka ah ama Satalaytka ah sidoo kale waxay iibiyaan ama kireeyaan sanduuq-yada dusha la saaro oo ay ugu talo-galeen adeegooda. (Fiiro gaar ah: sanduuqa dusha la saaro ee dhijitalka ah ee halkan ku qorani la mid maaha sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga, ee aan kor ku xusnay, ee loo isticmaalo in TV analoog ahi soo duwo barnaamij dhijital ah.)

Haddii tilifeeshankaaga uu ku suntan yahay "analoog" ama "NTSC," oo aanu ku SUNTANAYN in dhijital tuyuunar uu ku jiro, wuxuun baa ku jira tuyuunar analoog ah oo kaliya.

Haddii aanad garan karin in tilifeeshankaaga ama qalabkaaga kale ee tilifeeshanku uu ku jiro dhijital tuyuunar, waxaa lagugula talinayaa inaad hubsato magaca shirkada samaysay iyo lambarka moodeelkiisa, kadibna aad la xidhiidho tukaankaaga elektarooniga, ama soo saaraha, si aad u ogaato in dhijital tuyuunar la socdo iyo in kale. Warbixintan waxaa kale oo laga heli kara boga internet-ka ee shirkadda samaysay.

Madaama baddi idaacadaha ku yaal maraykanku ay imika ku baxaan dhijital, dadwaynuhu maantaba way daawan karaan DTV-ga. Waxaad la xidhiidhi kartaa idaacadahaaga maxalliga ah si aad u ogaato lambaradda janalada ay idaacaduhu imika ka sii daayaan barnaamiyyada dhijitalka ah. Kadibna waxaad hubsan kartaa in tilifeeshankaagu uu diyaar yahay barnaamijyada hawada ku jira (waa in aanad ku xidhnayn shirkada kiro ah sida kuwa kay-bulka iyo satalaytka), kadibna raadi janalada dhijitalka ah si aad u ogaato bal in tilifeeshankaagu uu soo qaban karo barnaamijyada warbaahinta dhijitalka ah.

***Ku nogo su'aalihii***

**Siddee baan ku garan kara kala duwanaanshaha DTV-ga "intagraytidh-ka ah (integrated)" iyo DTV-ga ama "Shaashadaha" HDTV-ga ?**

Intagraytidh (integrated) DTV waa tilifeeshan ay ku samaysan tahay tuyuunar (sidoo kale waxaa loo yaqaan "DTV". Tuyuunarka dhijitalka marmarka qaar waxaa la yidhaa DTV dhikowdhar (decoder) ama DTV risiifar (receiver). Haddii aad leedahay intagraytidh DTV, u baahan maysid qalab dheeri ah, marka laga reebo anteeno (labba anteeno midd uun: anteenada saqafka la saaro ama ta loo yaqaan "raabit eeris/rabbit ears" oo ku xidhan tilifeeshanka), si aad u soo duwato barnaamiyadda hawada ku jira. DTV-yadda intagraytidh-ka sidoo kale waxay soo qaban karaan oo laga daawan karaa barnaamijyadda ku baxa habka analooga, sidaa darteed dawashadii warbaahinta analooga ahaydna waad sii wadan kartaa.

Taa liddigeeda, DTV Moonitarku (Monitor) awood uma laha inuu soo qabto barnaamijyada ku baxa habka analooga qalab dheeri ah la'aantii; wax kale maaha ee waa dhalo/shaashad aan lahayn awooda so-duwida DTV-ga. Sanduuqa dusha la saaro oo dhijital ama HD ah waa in lagu xidhaa anteenada iyo shaashada dhexdooda si loo soo duwo ama loo helo loona daawado barnaamijyada dhijitalka ama HD-ga ah.

Haddii aad haysato "Moonitar/Monitor" dhijital ama HD ah oo aad jeceshahay inaad iibsato sanduuqa dusha la saaro oo dhijital ama HD ah si aad u daawato barnaamijyada, ka xaqiiji tukaankaaga in sanduuqan dusha la saara la shaqayn karayo Moonitarkaaga/shaashadaada.

***Ku nogo su'aalihii***

**Ka warran VCR-kii, DVD-yaddii, kamaradihii gacanta, iyo qalabka ciyaaraha? Ma ku isticmaali karayaa telifeeshanka dhijitalka ah?**

Haa.Tilifeeshanada dhijitalka ahi waa " kuwo la shaqeeya qalabkii hore u jiray (backward compatible)," taa macnaheedu waxaa weeyi in qalabkii analooga ahaa ee hore u jiray (VCR-yadda, DVD-yadda, kamarada gacanta, ciyaaraha fiidiyowga, iwm) ay ku shaqayn doonaan TV-yada dhijitalka ah. Si kastaba ha ahaatee, fiidiyoogooda waxaa loo soo gudbinayaa heerka muuqaalka ugu sareeya ee agab kasta oo analoog ahi leeyahay. Shirkadaha sameeya qalabku waxay soo saarayaan dhowr isku-xidhayaal ah (connectors) si ay iskugu xidhaan dhowr qalab si loo horumariyo tayada sawirka iyo codka ee marka DTV lagu isticmaalo qalab hore u jiray oo analoog ah.

***Ku nogo su'aalihii***

**Siddee baan ku helayaa barnaamijyada DTV-ga ama HDTV-ga?**

Si loo soo duwo barnaamij dhijital ah (halkii shirkad kay-bul ama satalayt laga soo kiraysan/iibsan lahaa barnaamijyadda dhijitalka ah), waxaad u baahan doontaa: (1) DTV (DTV leh tuyuunar) ama TV analoog ah oo ku xidhiidhsan sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga iyo (2) anteeno idaacadeed (labba anteeno midkood: anteenadan la saaro saqafka ama nooca loo yaqaan "raabit eeris/rabbit ears" oo ku xidhan tilifeeshankaaga". Guud ahaan, anteenada tayadeeda soo duwida warbaahinta analooga ahi sareyso way ku shaqayn karaysaa warbaahinta dhijitalka ah.

Liiska idaacadaha TV-yadda ah ee ku baxaya habka dhijitalka ah waxaa laga heli karaa **http://www.fcc.gov/mb/video/files/dtvonair.html**. Shirkadaha TV-yada satalaytka ah iyo kuwo kale oo badan ahna nidaamka kay-bulka ayaa imika sii daaya barnaamijyo dhijital ah. Macaamiishu waa inay shirkadahooda adeega siiya ka hubsadaan barnaamij-yada dhijitalka ah ee ka jira dhinacooda.

***Ku nogo su'aalihii***

**Ma anteeno gaar ah baan u baahan nahay si aan DTV-ga uga soo leexsado hawadda?**

Guud ahaan, soo duwid la isku haleeyo oo ah barnaamijayda dhijitalka ahi waxay u baahaan tahay signal la nooc ah signalka qalabka soo duwaha ah ee imika barnaamihyada TV-ga analoogi ah ku shaqaynayo ee tayadiisu sareyso. Haddii aad u baahan tahay anteenada saqafka la saaro si aad u soo duwato baahinta TV-yadda analooga ah, isla anteeno la mid ah taas ayaa kuugu shaqayn doonta inay kuu soo du'do baahinta TV-yada dhijitalka ah. Uma baahnid inaad iibsato anteenoyinka lagu suuq-geeyo ereyada *"digital ready" ama "HD ready."*

***Ku nogo su'aalihii***

**Muxuu yahay mustaqbalka telifeeshanadii hore ee analooga ahaa ee uu badalay kan dhijitalka ahi ama DTV-ga ahi? Ma jirri doonaa dedaal dib loogu warshadaynayo (recycle) iyaga?**

Dadka doorbidda inay iska tuuraan TV-yadda analooga ah waxaa diyaar u ah barnaamijyo dhib loogu warshadaynayo (recycle) TV-yadda analooga ah ama agabka kale ee elektorooniga ah (laakin xasuusnow in TV-yada analooga ah la isticmaali karo kadib marka laga guuro). Barnaamijydan waxaa ka mid ah kan la yidhaa *myGreenElectronics.* Barnaamijkan waxaad ku baranaysaa siyaabaha aad u tuurayso iyo inaad ogaato barnaamijka noocan ah ee kuugu dhow. Waxaad booqataa **http://www.mygreenelectronics.org** haddii aad u baahan tahay faahfaahin dheeri ah.

***Ku nogo su'aalihii***

## Kay-bulka iyo Satalayt-ka

**Geediga ama u guurista DTV-gu wax saamayn ah miyuu ku yeelanayaa TV-yadda ku xidhan adeegyada kay-bulka?**

Maya. Haddii aad macmiilato adeeg kay-bul ah, geediga DTV saamayan ku yeelan maayo TV-yada ku xidhan adeega kay-bulkaaga. Geediga DTV-gu wuxuu khuseeyaa idaacadaha TV-yada ee ful baawarka ah -waa kuwa isticmaalia mawjadaha dawlada si ay barnaamijyadooda ugu tabiyaan daawadayaasha iyaga oo sii marinaya anteeno.

***Ku nogo su'aalihii***

**FCC miyay shirkadaha kay-bulka u wareejinaysaa adeeg dhijital ah?**

Maya.Shirkadaha kay-bulka loogama baahna inay u guuraan adeeg dhijital ah. Shirkadaha kay-bulku iyagaa ikhtiyaar u leh in ay qayb ama gabbi ahaanba adeegooda ka dhigaan dhijital, laakiin lagama rabo inay ka guuraan adeega analooga ah ee ay imika bixiyaan. Sida runtu tahay, FCC waxay uga baahan tahay shirkadaha kay-bulka inay sii wadaan inay analoog siiyaan idaacadaha maxalliga ah ilaa inta ay bixinayaan adeeg analoog ah, xataa wixii ka dambeeya February 17, 2009.

***Ku nogo su'aalihii***

**Miyay shirkadayda kay-bulku ii siinaysaa sanduuq aan ku helo janaladda kay-bulka ah ee aan maanta ku daawado sanduuq la'aanta?**

Qaar ka mid ah shirkadaha kay-bulka ayaa go'aansadey inay u guuraan adeeg dhijital ah. Arrintani waa go'aan ganacsi oo ay gaadheen shirkadaha kay-bulku balse aanay khasab kaga dhigin dawlada federaaliga ahi. Waxaa laga yaabaa in shirkadaada kay-bulku go'aan ku gaadho inay qayb ka mid ah janalada ka saarto lakabyada adeegeeda analooga una rarto lakabyada adeegeeda dhijitalka ah, amabase ay go'aansato inay mar qudha dhamaan u wareegto adeega dhijitalka ah oo macaamiishu aanay helin adeeg analoog ah. Haddii shirkadaada kay-bulku go'aansato inay qayb ama dhamaan janaladeeda u wareejiso dhijital, waxaa laga yaabaa inay ku ogaysiiso inaad soo qaadato "kay-bul/xadhig dhijital ah" si aad u sii isticmaali kartid adeegaa kay-bulka. Waxa dhici karta inaad soo kiraysato ama soo iibsato sanduuqa kay-bul dhijitalka ah ee sanduuqa dusha la saaro ama inaad soo iibsato kay-bul ku shaqaynaya dhijitalka oo leh godka "CableCARD-ka". Qalabka kay-bulka dhijitalka ahi wuu ka duwan yahay sanduuqa isku-bedela analooga iyo dhijitalka ee loo adeegsado in lagu leexiyo signalada warbaahinta.

***Ku nogo su'aalihii***

**Siddee baan ku ogaan karaa haddii TV-gayga kay-bulka ama satalaytka ahi ku borogaraamsan yahay dhijitalka?**

Waxaa laga yaabaa inaad soo duwato barnaamij dhijital ah haddii aad shirkadaada ka macmiilato dhijital ama bushqad HD ah oo barnaamijyada dhijitalka ahna aad ku daawanayso tilifeeshan dhijital ah. Si kastaba ha ahaatee, lakabyada kay-bulka dhijitalka ah iyo TV-ga satalaytka ahi daruuri maaha inay noqdaan DTV.Nidaamkaaga kay-bulka ama satalaytka waxaa laga yaabaa inuu adeegsanayo farsamo/tiknoolijayad dhijital ah si barnaamijyadda analooga ah laguugu soo gudbiyo si heer sare ah. Haddii aad leedahay tilifeeshan analoog ah, waxaa hubaal ah in aanad helayn dhijital, inkastoo laga yaabo in soo-duwida la horumariyey. Ka hubso shirkadaada kay-bulka ama satalayt-ka inaad ka ogaato noocyada barnaamijyada aad soo duwan karto, iyo qalabka aad u baahan tahay inaad soo duwato.

***Ku nogo su'aalihii***

**Shirkadayda kay-bulku waxay i siisaa bushqad kay-bulka dhijitalka ah (digital cable package). Tanni ma la mid baa HDTV-ga?**

Maya. " Kay-bulka dhijitalka" iyo barnaamijka haay dhifinishanku isku mid maaha. Haddii aad rabto inaad barnaamij HDTV ah ka daawato kay-bul, waxaad u baahan tahay inaad macmiilato bushqada HDTV-ga ee shirkadaada oo aad barnaamijyada ka daawato HDTV-ga.Waxaa kale oo

laga yaabaa inaad u baahato sanduuqa dusha la saaro ama qalab kale oo aad ku daawato barnaamijyada HDTV-ga.Ka hubso shirkadaada kay-bulka noocyada barnaamijyo ah ee aad soo duwan karto, iyo qalabka aad u baahan tahay.

*Ku noqo su'aalihii*

**TV-yadda kay-bulka ah, sida CNN-ta, MSNBC, Lifetime, iwm, ma waxay iyaguna sidoo kale u guurayaan baahinta dhigitalka ah?**

Maya.Amarka lagaga guurayo analooga ee loogu guurayo dhijitalku wuxuu khuseeyaa idaacadaha TV-yada ee ee ful baawarka ah -waa kuwa isticmaala mawjadaha dawlada si ay u sii daayaan barnaamijyo bilaasha ah. Si kastaba ha ahaatee, marka shirkadaha kay-bulku u wareejiyaan sistamkooda dhijital, waxaa laga yaabaa inaad macmiilato lakabkooda dhijitalka si aad u sii wadato helista barnaamij kan aan la tebin.

*Ku noqo su'aalihii*

**Sistamkayga kay-bulka barnaamijyada ma u rari karaa isku xidhe dhijital ah kaas oo i ogolanaaya inaan macmiisho adeeg dhijital ah?**

Sistamkaaga kay-bulka ayaa go'aaminaya goorta iyo bal inaad barnaamijyada ku wadan karto dhijital, taas oo macnaheedu yahay inaad u baahan nayso qalab dhijital ah. Si kastaba ha ahaatee, dhamaan xarumahaaga maxalliga ahi waxay u sii jiri doonaan qaab analoog ah ilaa inta sistamkaaga kay-bulku uu bixinayo adeeg analoog ah.

*Ku noqo su'aalihii*

**Macaamiisha kay-bulka ee leh telifeeshan analoog ahi ma waxay shirkadooda kay-bulka ka iibsanayaan ama ka kiraysanayaan sanduuqa dusha la saaro (set-top box)? Haddii ay sidaa tahay, qiimuhu muxuu noqonayaa?**

Marka hore, waxaa muhiim ah in la ogaado in waqtiga kama dambaysta ee February 17, 2009 ee geediga dhijitalku uu kaliya khuseeyo idaacadaha ful baawarka ah. Shirkadaha kay-bulka dawladu ugama baahna inay sistamkooda u guuriyaan dhijital, waxayna sii wadan karaan in barnaamijyadooda ku baahiyaan habka analooga. Sida dhabta ah, waxay qawaaniinta FCC shirkadaha kay-bulka ka rabaan ilaa inta ay bixinayaaan adeeg analoog ah inay idaacadaha maxalliga ahi siiyaan macaamiishooda barnaamijyada ugu tebiyaan analoog. Amarkani wuxuu sii jirayaa ugu yaraan saddex sanno kadib February 17, 2009. Guddida ayaa go'aamin doona sannadka 2011 in amarkan la sii waddo wixii ka dambeeya February 17, 2012.Taa macnaheedu waxaa weeyi in macaamiisha soo du'da adeeg kay-bul oo analoog ah (kay-bulka sanduuqa dusha la saaro la'aantii) ay awoodi doonaan inay sidaa yeelaan.

Si kastaba ha ahaatee, arrimo ganacsi awgeed (iyo kuwo kaleba, dhijitalku wuu ka waxtar badan yahay analooga), shirkadaha kaybulku waxaa laga yaabaa inay daneeyaan in sistamkoodu ka wareejiyaan analoog una wareejiyaan dhijital. Haddii shirkaddi gaadho go'aanka ganacsi ee ah ina dhijital u wadda wareegto (taas oo macnaheedu yahay inay joojin doonto janalada analooga ah ee ay macaamiisheed u sii dayso), waa inay hubsataa bal in macaamiisheeda tilifeeshanada analoogi ahi ay sii daawan karaan daawashada idaacadaha maxalliga ah. Arrintan awgeed waxaa la arkaa in macaamiisha haysata tilifeeshano analoog ahi ay u baahdaan inay helaan sanduuqa dusha la saaro. Haddii shirkada kay-bulku macaamiisha siiso sanduuqa dusha la saaro, kharash kasta oo la xidhiidha waxaa ogaanaya shirkada kay-bulka. Sidaa darteed, waxaa lagu talinayaa in macaamiisha kay-bulka ee analooga haysataa ay la xidhiidhaan shirkadooda kay-bulka si ay u waydiiyaan bal in sanduuqa dusha la saaro loo baahanayo, goorta loo baahanayo, iyo haddii kharash jirayo.

Waxaa kale oo muhim ah in la ogaado in kay-bulka sanduuqa dusha la saaraa ka duwan yahay sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga. Sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analoogu wuxuu lama huraan u yahay kaliya tilifeeshanada analooga ah ee barnaamijyada ku soo hela anteenada saaran saqafka ama "raabit eeris/rabbit ears" ku xidhiidhsan tilifeeshanka. Sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analoogu daruuri uma ah TV-ga ku xidhan shirkad lacag ku qaadata

adeega tilifeeshanka sida shirkadaha kay-bulka ama satalaytka. Macluumaadka ku sahabsan sanduuqa dusha la saaro ee uu u baahan yahay tilifeeshan lacag laga bixiyaa sida kay-bulka ama satalaytka waa in laga doontaa shirkada adeega fidinaysa.

*[Ku noqo su'aalihii]*

**Geediga ama u guurista DTV-gu wax saamayn ah ma ku yeelanaysaa TV-yadda ku xidhan adeegyada satalaytka?**

Geediga DTV-gu saamayn ku yeelan maayo macaamiisha TV-ga satalaytka ee TV-yadooda ka daawada suxuunta satalaytka. Adeega TV-ga satalaytka ahi waa adeeg dhijital ah waana in dhamaan macaamiisha satalayt-ku ay haystaan sanduuqa dusa la saaro ee ku xidhmaya TV-yaddooda si ay u leexistaan barnaamijyada satalaytka lagu soo gudbinayo.Natiijadu waxay noqonaysaa, in aan isbedel xaga adeega ahi ku imanayn macaamiisha satalaytka haddii aanay TV-yadda maxalliga bixin satalayto. Haddii aad macmiilato adeeg satalayt waxaad shirkada aad ka macmiilato ka hubsataa inaad idaacadaha TV-ga maxalliga ah aad ku soo leexsan karto saxanka satalaytka.

*[Ku noqo su'aalihii]*

## Sanduuqa isku-bedelka

**Barnaamijka waraaqaha qiimo-dhimista ee sanduuqa isku-bedelku (Converter Box Coupon program) muxuu yahay?**

Si loo caawiyo dadwaynaha inta lagu gudo jiro geedigan DTV-ga, dawladu waxay abuurtay barnaamijka qiimo-dhimista ee sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analooga. Hay'adda Qaranka ee Wararka iyo War isgaadhsiinta (National Telecommunications and Information Administration (NTIA)), oo qayb ka ah Waaxda Ganacsiga, ayaa maamulaysa barnaamijkan. Qoys kasta oo maraykan ah way u furan tahay inuu helo ilaa laba waraaqo-qiimo-dhimisood oo kuu aadan iibsiga sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analooga, oo midkiiba u dhigmo $40.Bilowga bisha January ee sannadka 2008, NTIA waaxay bilaabi doontaa qabashada codsiyadda qiimo-dhimista. Waraaqaha qiimo dhimista waxaa loo isticmaali karaa sanduuq-yadda isku-bedelka ay iibinayaan tukaanada elektorooniga ee ka qaybta ah barnaamijka, waraaqda qiimo dhimista waxaa la isticmaali karaa waqtiga wax iibsiga. (Fadlan ogow in waraaqaha qiimaha dhimistu ay dhacayaan 90 maalmood ka dib marka boosta lagu diro). Shirkadaha soo saara sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analoogu waxay qiimahooda ku qiyaaseen $40 ilaa $70 xabadiiba. Waa qiime mar kaliya ah. Wixii faahfaahin dheeri ah ee ku sahabsan barnaamijka qiimo-dhimista sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga, waxaad booqataa **[www.dtv2009.gov]**, ama wac tilifoonka lambarkiisu yahay 1-888-388-2009 (cod) ama 1-877-530-2634 (TTY).

*[Ku noqo su'aalihii]*

**Waa kuwee sanduuq-yada isku-bedelka ee loo ogol yahay qiimo dhimista?**

Hay'adda Qaranka ee Wararka iyo War isgaadhsiinta (National Telecommunications and Information Administration (NTIA)) ayaa haysa liiska sanaaduuqda leh qiimo dhiimista kaas oo laga eegi karo **[https://www.ntiadtv.gov/cecb_list.cfm]**.

*[Ku noqo su'aalihii]*

**Waa kuwee sanduuq-yada isku-bedelka ee loo ogol yahay qiimo dhimista?**

Waxaad u baahan tahay hal sanduuq isku-bedel dhijilka iyo analoog halkii TV ee kasta ama qalab ee kasta (sida VCR-da) ee leh hal tuyuunar. Sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga wuxuu bedelaa tuyuunarka analooga ee ku jira qalab. Sidaa darteed, haddii aad rabto inaad mar kaliya wadda isticmaasho TV-gaaga analooga ah iyo VCR-ka (Tusaale ahaan, si aad u daawato barnaamij isla markaan u duubato), waxaad u baahanaysaa laba sanduuq isku-bedel dhijital iyo analoog.

*[Ku noqo su'aalihii]*


**Sanduuqa isku-bedelka ee dhijitalka u bedela analooga (ee loo isticmaalo in baahinta TV-ga dhijitalka loogu daawn karo mid analoog ah) miyaa sidoo kale loo isticmaali karaa dhijital qoraalada xidhan ah (digital closed captioning)?**

Haa.Qawaaniinta FCC waxay u baahan yihiin in sanduuqa isku-bedelka analooga uu awood u leeyahay muujinta qoraalka xidhan (closed captioning) ee TV analooga ah. Fiiri [http://www.fcc.gov/cgb/consumerfacts/dtvcaptions.html](http://www.fcc.gov/cgb/consumerfacts/dtvcaptions.html).

***Ku noqo su'aalihii***

**Waxaan haystaa anteeno duug ah taas oo ay laba waayir ku xidhiidhiyaan TV-gayga.Miyaan u baahan nahay ateenada noocan ah inaan u isticmaalo sanduuqa isku bedelka?**

Haa, laakiin waxaad u baahan tahay inaad hesho labbo adhabtar/adapter (siddoo kalena loo yaqaan *"baluns"* ama *"matching transformers,"* waana kuwa hoos ku sawiran*).* Ka fur anteenadii hore ee labbada-birood lahayd halka TV-ga godka ay ku qoran tahay *"Antenna In".* Ku xidh anteenadaa hore waayirkeeda godka labadda-birood leh ee adhabtarka labada-birood leh (labada sawir ee hoosta ka hore). Ka dibna xidhiidhiyaha adhabtarka labadd-birood leh gali godka ay ku qoran tahay *"Antenna In (RF)"* ee sanduuqa isku-bedelka ku yaal. Afka kalena gali adhabtarka (lababada sawir ee hoosta ka labaad). Kadibna ku xidh adhabtarka godka ay ku qoran tahay *"Antenna In"* ee TV-gaaga.




[Rakibista Sanduuqaaga Isku-Bedelka Dhijitalka iyo Analooga (Baysik iyo waayir anteeno laba-birood leh)]()

***Ku noqo su'aalihii***

## Su'aalo Guud

**Ka warran tilifeeshankayga la qaadan karo ee ku shaqeeya baytariga? Ma u isticmaali karayaa inaan ka daawado baahinta tilifeeshanka wixii ka dambeeya February 17, 2009?**

Tilifeeshanka analooga ah la ee qaadan karo baytarigana ku shaqeeya waxaa laga yaabaa inuu soo qabto barnaamijyada wixii ka dambeeya February 17, 2009 haddii ay ku xidhan yihiin sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga. Madaama imika aan imika la heli karin sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analooga oo ku shaqeeya baytari, il koronto oo dibada ah ayaa loo baahanayaa. Haddii korontada degaanka aan la heli karin, xarun baytari oo dibada ah ama dab dhaliye degdeg ah ayaa laga yaabaa inuu siiyo dabka lama huraanka u ah sanduuqa isku-bedela.

Siddoo kale, waxaa suuqa soo galay tilifeesho dhijital ah oo la qaadan karo, baytarina ku shaqeeya. Haddii tilifeeshankaaga aad qaadan karto uu ka kooban yahay sumad ama calaamado ah ereyadan *"Integrated Digital Tuner," "Digital Tuner Built-In," "Digital Receiver," ama "Digital Tuner," "DTV," "ATSC," ama "HDTV Built-In",* markaa waxaad awoodi doontaa inaad daawato barnaamijyada dhijitalka ah addiga oo aan u baahan sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga. Fadlan ka hubso tukaankaaga elektarooniga helitaankooda iyo macluumaad dheeri ah oo ku sahabsan agabkan.

***Ku noqo su'aalihii***

**AM/FM-ta raadiyooga tilifeeshankayga analooga ahi ma sii shaqayn doonaa wixii ka dambeeya February 17, 2009?**

In kasta oo geediga tilifeeshanka dhijitalka ahi aanu saamayn ku lahayn warbaahinta raadiyowga ee AM/FM-ta, haddana shaqaynta raadiyoow ku lamaan tilifeeshan analoog ah waxay ku xidhan tahay qalabka iyo isku-xidhnaantiisa.

Haddii aanu jirin sanduuq isku-bedela dhijitalka iyo analooga oo ku dhejisan raadiyooga/tilifeeshanka isku jira, raadiyooga tilifeeshankaaga wuxuu u sii shaqayn doona siddii hore.

Haddii uu jiro sanduuqa isku-bedelka dhijitalka iyo analooga oo ku xidhan raadiyoogaag/tilifeeshankaaga isku jira, oo ay ku shaqaynayaan anteeno dibada ah oo ku xidhan sanduuqa isku-bedelka ee raadiyooga, raadiyoogu wuu shaqayn doonaa haddii sanduuqa isku-bedelka uu ogolanaayo in analoogu dhex maro.NTIA ayaa haysa liiska sanduuq-yada ogalaada in analoogu dhexmari karo waxaadna ka fiirin kartaa **www.ntiadtv.gov/cecb_list.cfm** (waxaa lagu muujiyey xidig (asterisk)).Raadiyoogu wuu shaqayn doonaa haddii radiyooga/tilifeeshanka isku jiraa aanay ku xidhnayn sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga.

Haddii AM/FM-ta raadiyooga/tilifeeshanka isku jiraa uu ku tiirsan yahay anteeno gaar ah taas oo aan ku xidhnayn sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga, wuxuu awoodi doonaa in soo qabto baahinta AM/FM-ta haddii ay sanduuq isku-bedel ku xidhan tahay iyo hadii kaleba.

***Ku nogo su'aalihii***

**Raadiyoogaygu imika wuxuu soo qabtaa codka janalada TV-ga.Ma shaqayn doontaa wixii ka dambeeya February 17, 2009?**

Raadiyooyada loogu talo galay inay soo qabtaan codka TV-yada analooga ah awood u yeelan maayaan inay soo qabtaan qaybta codka ee warbaahinta dhijitalka ah. Waxaa laga yaabaa inaad ku fikirto inaad hesho TV dhijital ah oo cusub ama radiyow soo qaban kara qaybta codka ee tilifeeshanka dhijitalka ah, marka ay soo galaan suuqa.

***Ku nogo su'aalihii***

**Raadiyoogayga AM/FM-ta ee maxalliga ahi wuxuu dib u baahiyaa codka jaanal TV ah. Raadiyooga ma u suurtagali doontaa arrintani wixii ka dambeeya February 17, 2009?**

Signalka codka iyo muuqaalka baahinta tilifeeshanka dhijitalka ah waxaa la iskugu dhafay hab TV-ga doonaya inuu dib u baahiyo codka AM/FM-ta uu u baahdo inuu rakibo qalab si uu sii waddo adeega. Fadlan ka hubso idaacadaada AM/FM-ta bal inay dib u sii wadayaan dib u baahinta codka TV-ga doonaya.

***Ku nogo su'aalihii***

**Telifeeshankayga maxalliga ahi wuxuu dib u baahiyaa AM/FM-ta raadiyooga taas oo laga dhegaysto janalka TV-ga.Wali ma ii sii suurtoobi doontaa inaan idaacadahan ka dhagaysto tilifeeshankayga wixii ka dambeeya February 17, 2009?**

Haddii tilifeeshankaaga maxalliga ahi uu dib uga baahiyo idaacado raadiyow janaal TV-fii ah, waxaad u baahan doontaa sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga si aad u daawato janalkaa tilifeeshanka isla markaana u maqasho codka TV-ga analooga ah.

***Ku nogo su'aalihii***

**Tilifeeshanada dhijitalka ahi ma sii waddi doonaan inay bixiyaan digniinaha xaaladaha degdega ah?**

Haa.Xarumaha tilifeeshanka dhijitalka ah waxaa laga rabaa inay sii wadaan sistamka digniinta xalaadaha degdega ah (Emergency Alert System-EAS). Wixii war dheeri ah fadlan ee ku sahabsan EAS, fadlan booqo **www.fcc.gov/cgb/consumerfacts/eas.html**.

***Ku nogo su'aalihii***

**Maxay yihiin TV-yadda loo baawarka ah (low power –LTV), Galaas A (class A), iyo TV-yadda taranslaytarka (TV translator stations) siddee baanay u guurista DTV-gu u saamaynaysaa iyaga?**

Waxaa laga yaabaa inaad ogaatay in Kongareesku amray in TV-yadda "ful baawarka ah (full power)" ayna awoodi doonin in ay ku baxaan analooga wixii ka dambeeya February 17, 2009.Tiiyoo baddi TV-yadda la daawadaa yihiin kuwo ful baawar ah, waxaa jira saddex nooc oo kale- idaacadaha "loo-baawar (low-power)", idaacadaha "Galaas A'da ah (Class A)", iyo idaacadaha "taraanslaytor TV-ga (translator TV)". Imika ma jiro waqti kama dambays ah oo loo qabtay noocyadan TV-yadda ahi inay u guuraan habka baahinta dhijitalka.

FCC waxay abuurtay adeeg tilifeeshan oo loow-baawar ah (LPTV) sannadkii 1982 si fursad loo siiyo tilifeeshanada u go'ay u adeegida bulshadda maxalliga ah. Bulshooyinkani waxaa laga yaabaa inay joogaan meelo miyi ah ama waa bulshooyin ku dhex nool magaalooyinka. Idaacadaha LPTV-ga waxaa maamula kooxo kala duwan iyo ururo ay ku jiraan dugsiyo sare, kulliyaddo, kiniisado, iyo kooxo diini ah, dawlada hoose, ganacsiyo yaryar iyo kuwo dhexe iyo muwaadiniin. In ka badan 2,100 idaacadood oo LPTV ah oo liisan haysta ayaa hawl-gala. Barnaamijyada LPTV waxaa ku jira barnaamijyadda lagu soo gudbiyo adeega satalaytka, barnaamijyada sawirada, aflaanta, iyo barnaamijo dhowr ah oo si heer degaan ah.

Sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga si aad u fiirsato barnaamijyadda tilifeeshanka dhijitalka ah. Qoy kasta oo Maraykan ah wuxuu xaq u leeyahay inuu helo labo waraaqda qiimo-dhimista ah oo u dhiganta $40 oo uu ku isticmaalo iibsashada laba sanduuqyada isku-bedela dhijitalka iyo analooga. TV-yadda Galaas A'da (Class A) ah waa LPTV-yo hore oo leh xuquuq ka xafida farogelinta taas oo ayna lahayn LPTV-yaddu.Farsamo ahaan idaacadahani waa la mid TV-yadda LPTV-ga ah, lakiin waxay kaga duwan yihiin iyagoo ay khasab tahay in todobaadkii saddex jeer sii daayaan barnaamij maxalli ah isl markaana u hogaansamaan xeerarka aan farsamada ahayn ee ku taxaluqa TV-yadda ful baawarka ah.Ku dhawaad 600 oo Galaas A ah ayaa shaqeeya.

Taraanslaytor TV-gu wuxuu dib u baahiyaa barnaamijyadda TV-yadda ful baawarka ah (full power). Idaacadaha taraanslaytarka ahi waxay u adeegaan bulshooyinka aan helin karin barnaamijyadda TV-ga ee bilaashka ah iyaga oo aad uga TV-yada ful baawarka ah awgeed ama juquraafiga awgii (Sidda buuro aan isku sinayn). Qaar badan oo ka mid ah 4,700 ee taraanslaytar TV ee liisanka haystaa waxay ka hawl-galaan meelo buuro ah ama meelo aad u fog oo wadanka ah.

Waxaa jira dhowr hab oo aad u go'aamin karto in idaacad warbaahineed oo aad daawataty (lehna anateeno saqafka saaran ama anteeno "raabit eeris/rabbit ears" ah oo ku xidhan TV-gaaga) inay tahay LPTV, Galaas A, ama TV taraanslaytar iyo in kale.Kuwa Galaas A'da ah waxaa laga rabaa inay si muuqaala ah iyo af ahaan u sheegaan TV-gooda iy bulshada ay liisanka u haystaan iyo calaamadooda (oo ay dabagale u tahay "-CA" oo u taagan *Class A"* marka ay soo galaan iyo, marka ay ka sii baxayaan iyo si saacad leh ahba. TV-yadda LPTV-ga calaamadoodu waxay ka kooban tahay afar xaraf oo ay xaga dambe (daba-gale) ka raacaan "-LP" (kuwa loo baawarka ah) ama, taa bedelkeeda, shan xaraf oo ku bilaabmaya xarfaha K ama W oo ay raacayaan labo lambar (Janalkooda ay ka soo galaan) iyo labbo lambar oo kale. Siddoo kale, qaar ka mid ah TV-yadda taraanslaytariska ah ayaa lagu aqoonsadaa magaca TV-gooda ful baawarka ah ee ay dib u baahiyaan magaciisa oo buuxa. Intaa waxaa dheer, LPTV, Galaas A, iyo TV-yadda taraanslaytariska ah oo laga yaabo inay si joogto ah u baahiyaan wararka ku sahabsan meeqaankooda (status), waxaan laga yaabaa inay ku daraan war ku sahabsan geediga DTV-ga.

Iyaddoo February 17, 2009 ay tahay waqtiga kama damaysta ah ee loo qabtay dhamaadka warbaahinta analoog ma khuseeyo loow baawarka,Galaas A'da, iyo TV-yada taraanslatarka xarumahooda, FCC waxay mustaqbalka idaacadahan uga baahan doontaa inay u guuraan baahin dhijital .Ku dhawaad 2,000 oo idaacadahan ka mid ah ayaa loo ogolaaday inay samaystaan tasiilaadkii dhijitalka qaar kalena waxayba diyaar u yihiin inay dhijital ku baxaan.FCC waxay imika ka fikiraysaa arrimaha ku xeersan u wareejinta idaacadaha loow boowarka ah hab dhijital ah waxayna samayn doontaa go'aanada arintan khuseeya mustaqbalka.

Haddii aad haysato tilifeeshan analog kaliya ah kaas oo barnaamijyadda ku soo qabsada (anteenada saqafka la saaro ama anteenada “raabit eeriska/raabit ears” ee TV-ga la dul dhigo), waxaad u baahan doontaa inaad iibsato sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga si aad u fiirsato barnaamijyadda tilifeeshanka dhijitalka ah.Qoy kasta oo Maraykan ah wuxuu xaq u leeyahay inuu helo labo waraaqda qiimo-dhimista ah oo u dhiganta $40 oo uu ku isticmaalo iibsashada laba sanduuqyada isku-bedela dhijitalka iyo analooga. Hay’adda Qaranka ee Wararka iyo War isgaadhsiinta [National Telecommunications and Information Administration (NTIA)], ayaa maamulaysa barnaamijkan. (Fadlan waxaad ogaataa in waraaqaha qiimo-dhimistu ay dhici doonaa 90 maalmood kadib marka boosta lagu soo diro). Macluumaad dheeri ah waxaa laga heli kara boggan **www.dtv2009.gov**, ama adigoo waca tilifoonadan 1-888-388-2009 (voice) or 1-877-530-2634 (TTY).

Haddii aad iibsato sanduuqa isku-bedela dhijitalka iyo analooga si aad uga daawato barnaamijyada TV analoog ah oo aadna jeclaan lahayd inaad sii wadato daawashada LPTV-yada analooga ah, Galaas A’ga, ama TV-yada taraanslaytarka ah, waa inaad iibsataa sanduuq isku-bedel oo leh awooda “gudbinta analooga”, kaas oo baahinta analooga ah u ogolaanaya inay signaladoodu ka gudbaan sanduuqa isku-bedelka ee uu mawjadeeda waddo TV-ga analooga ahi. Barnaamijka qiimo dhimista sanduuqyada isku-bedelka ee NTIA wuxuu tasdiiqiyey moodeelo ka mid sanduuqa isku-bedelka kuwaas oo leh awood gudbinta analooga. Liiska sanduuqyada loo ogol yahay qiimo dhimista waxaa laga heli karaa **https://www.ntiadtv.gov/cecb_list.cfm.** Moodeelada sanduuqyada leh awooda gudbinta analooga ee liiskan ku jira waxaa lagu calaamadiyey xidig (asterisk) agtooda lagu muujiyey. Intaa waxaa dheer, NTIA waxay boosta ugu soo diri doontaa qoys walba liiska sanduuqyada qiimo dhimista galaya, iyaddoo lagu calaamadinayo xidig kuwa leh awooda gudbinta analooga. Ka hubi tukaankaaga bal in sanduuqa aad iibsanaysaa leeyahay awooda gudbinta analooga.

Haddii aad iibsato sanduuqa iskku-bedelka oo aan lahayn awooda gudbinta analooga, waxaa laga yaabaa inay kugu qasabto inaad anteeno ama signal “firdhiye” ku xidhiidhiso si aad u waydaarato sanduuqa haddii aad jeceshahay inaad daawato baahinta analooga ah. Ka hubi shirkada samaysay sanduuqa isku bedelka dhijitalka iyo analooga iyo tukaankaaga haddii aad u baahan tahay tilmaamo ku sahabsan sida loo xidhiidhiyo sanduuqa si aad u daawato baahinta analooga iyo dhijitalka labadaba.

Daawadayaashu waa inay ka raadsadaan LPTV-yada, Galaas A-ga, iyo TV-yadda taraanslaytarka ah macluumad ku sahabsan qorshayaasha ka guurista analooga ee loogu guurayo dhijitalka. Siddoo kale daawadayaashu waa inay booqdaan boggan **www.fcc.gov** si ay ula socdaan wixii ka soo kordha geediga dhijitalka ee low baawarka, Galaas A-ga iyo TV taraanslaytariska.

Liiska dhamaan xarumaha Galaas A-ga,LPTV-ga iyo TV-yada taraanslaytariska ah : **Excel**

**Qallabka raadinta Xarumaha Tilifeeshanada Loow Baawarka ah I**

***Ku noqo su’aalihii***

**Muxuu yahay ikhtiyaarkayga aan ku daawan doono TV-yadda analooga ah ee aan kaga daawan karo LPTV ama xarumaha taraanslaytor wixii ka dambeeya u guurista ama geediga dhijitalka?**

Si aad u daawato LPTV analoog ah iyo baahinta TV taraanslaytar ah oo ay soo leexisay anteeno, waxaad samayn kartaa mid ka mid ah talaabooyinkan soo socda:

- Samayso TV analoog ah oo ku xidhan anteeno si aad u daawato baahinta xarumaha LPTV-ga iyo taraanslaytar TV-ga.
- Waxaad iibsataa sanduuqa isku bedelka ee leh awooda gudbinta analooga.Liiska sanduuqyada isku-bedela dhijitalka iyo analooga ee ay NTIA u tasdiiqisay inay ka qaybgeli barnaamijka qiimo dhimista ayaad heli hadaad gujiso **https://www.ntiadtv.gov/cecb_list.cfm** waxaanad u fiirsataa sanduuqyada ku calaamadsan (*).Ka gudbida analoogu waxay kuu ogolaanaysaa inaad adigoo adeegsanaya sanduuqa daawato barnaamijyadda analooga iyo dhijitalka.

- Iibso sanduuqa analooga u bedela dhijital ee aan lahayn awooda gudbinta analooga, kadibna ku xidhiidhi “firdhiye” ama anteeno si aad u hesho baahinta analooga ah iyo tan dhijitalka ah labadaba.La xidhiidh tukaankaaga elektarooniga haddiii aad u baahan tahay tilmaamo ku sahabsan sida sanduuqa loogu xidho si aad u daawato barnaamijyada ka baxaya xarumaha analooga iyo dhijitalka labadaba.

- Iibso tilifeeshan dhijital ah. Tilifeeshan leh tuyuunar gudaha ugu jira wuxuu soo qaban karaa xarumaha analooga iyo dhijitalka, sidaa darteed waxaa suurto gal ah in aad daawato barnaamijyada dhijitalka ah iyo LPTV analooga iyo taraanslaytar TV-ga ilaa inta meelahaasi ku baxayaan habka analooga.

- Waxaad macmiilataa tilifeeshanada kay-bulka ah ama kuwa kale ee lacagta ah ee leh tilifeeshanada analooga ah ee rabto inad daawato.

***Ku noqo su’aalihii***

**Ma u isticmaali karaa tilifeeshanka dhijitalka ah waxyaabaha waalidku ku kantaroolo TV-ga sida V-chip-ka sida aan TV-ga analooga ah ba ugu isticmaalo?**

Haa. *V-chip*-ku waa tiknoolajiyada waalidiinta awood u siinaysa inay xanibaan barnaamijyadda tilifeeshanada iyagoo ku salayanaya darajadooda.Darajaddu waxay ku maldahan tahay signalka tilifeeshanka.V-chip-ka ayaa akhriyaya macluumaadka darajada ee barnaamij walba kadibna xanibaya barnaamij walba isaga oo u eegaya doorashada waalidka ee darajooyinka.Qawaaniinta FCC waxay u baahan yihiin in *V-chips*-ka lagu dhex sameeyo tilifeeshanka dhijitalka ah iyo qalabka kale ee soo qabta DTV-ga sida ay analoogaba ugu dhex samaysan yihiin.Hababka darajooyinka , oo sidoo kale la yidhaa “Tilmaamaha Waalidka ee TV-ga” waxaad ka fiirsan kartaa bogga **www.fcc.gov/vchip**.

***Ku noqo su’aalihii***

**Muxuu sawirka dhijitalku ee tilifeeshankaygu u buuxin waayay muraayada oo dhan? Maxay qotonida dusha iyo hoostu ama dhinacyada sawirka ugu muuqdaan borogoraam kale?**

TV-yaddii hore ee analooga ahaa waxay lahaayeen saami dhinacyeed dhan 4:3 (wuxuu iska ahaa iskuweer).Taa macnaheedu waxaa weeyi in muraayada TV-ga 4-tii iinj ee baladhka muraayada ahba ay weheliyaan 3 iinj oo dherekeeda ah.Baddi tilifeeshanada dhijitalka ah waxay leeyihiin saami dhinacyeed dhan 16:9 (laydi) waxaana loo yaqaan “muraayad balaadh (widescreen)”.Saami dhinacyeedka 16:9 wuxuu aad ugu eg yahay muuqaalka filimada iyadoo qadarka barnaamijyada ka baxaya saamigan 16:9 uu sii kordhayo.



Marka saamid dhinaceedka barnaamij tilifeeshan iyo ka tilifeeshankaagu isa seegaan, tiirarka dusha iyo/ama dhinacyada ee sawirka ayaa laga yaabaa inay kuu muuqdaan si loo sugo inaan humaagu isku-dhex yaacin.

Si si haboon ubucda 16:9 loogu muujiyo 4:3, waxaa laga yaabaa in tilifeeshankaaga dhijitalka ah ama sanduuqa isku bedela dhijitalka iyo analooga uu tiirar ku sameeyo oogada iyo hoosta humaaga- habkan waxaa la yidhaa *“letterboxing.”*

Siddoo kale, si si haboon ubucda 4:3 loogu muujiyo 16:9, waxaa laga yaabaa in tiiran lagu sameeyo dhinacyada shaashada- habkan waxaa la yidhaa *“pillar boxing.”*



Siddoo kale qaar ka mid ah barnaamijyada ayaa lagu sameeyaa habka "letterboxed" ama "pillar boxing" marka la baahinayo.Tusaale ahaan, xayaysiisyo badan ayaa lagu sameeyay analoog saami dhinaceedkiisu yahay 4:3, laakiin ogaal loogu sameeyay habka *"letterboxing-ka"* si muuqaalkoodu ugu ekaado "casri" ama si meel loogu baneeyo qoraalo hoosta lagu sameeyo.Marka xayaysiis-yadan lagu sii daayo barnaamij muraayad balaadh ah (16:9), waxaa lagu sameynayaa habka *pillar boxing*-ka.Tan natiijadeedu waa baahin qaabkeedu yahay 16:9 oo horeba u lahayd tiirar ka muuqanaya dusheeda iyo hoosteeda .Marka baahin noocan ah lagu daawado tilifeeshan saami dhinaceedkiisu yahay 16:9, waxaa soo baxaya tiirar ka muuqanaya dusha, hoosta, iyo dhinacyada- natiijadu waa habka la yidhaa *"postage stamp."*



Qaar badan oo ka mi ah sanduuqyada isku-bedela dhijitalka iyo analooga ayaa kuu ogolaanaya inaad humaaga "waynayso/yarayso" si meesha aad uga saarto tiirarka.Waxaa suurto-gal ah in qayb ahaan sawirku go' ama "rifmo".Siddoo kale qaar ka mid ah sanduuqyada isku bedela dhijitalka iyo analooga iyo tilifeeshanada dhijitalka ayaa iyagoo "fidinaya" ama "tuujinaya" sawirka leh awooda ay ku badalayaan sawirka si uu u le'ekaado shaashada.Fadlan ka akhri buuga la socda tilifeeshankaaga dhijitalka ah ama sanduuqa isku bedela dhijitalka iyo analooga wixii tafaasiil ah ee ku sahabsan siddii aad meesha uga saari lahayd tiirarka adigoo wayanaynaya/yaraynaya , fidinaya, ama tuujinaya sawirka ka muuqda shaashada.

***Ku noqo su'aalihii***

**Maxay barnaamijyada qaar ugu muuqdaan inay ka "waadix san yihiin" kuwo kale ee tilifeeshankayga dhijitalka ah?**

Iyaddoo ay ku xidhan tahay tilifeeshankaaga, waxaa laga yaabaa inaad ogaato muuqaalka sawirka oo isla bedelay barnaamijyada.Marka Tilifeeshanada muuqaalkoodu sareeyo, janalada ama barnaamijyada muuqaalkoodu hooseeyo waxay ku soo baxayaan muuqaalka hoose.Sidaa darted, bedbedaalada la isku bedbedelo janaal ama barnaamij ku baxaya muuqaal sare iyo janaal ama barnaamij ku baxaya muuqaal hoose waxay keentaa in si muuqata tayada sawirku u lunto.

Muuqaalda (resolutions) ay warbaahintu isticmaasho waxaa ka mid noqon kara:

| | |
|---|---|
| **Standard Definition TV (SDTV)** - Waa heer aasaasiga ah ee dhijitalka iyo analooguba u muujiyaan muuqaalka (resolution). SDTV waxaa lagu soo gudbin karaa saami dhinaceedkii hore (4:3) ama ka muraay-balladhka (19:6) waxaanu ka kooban yahay 480 xariiq-muuqaal. | SDTV STANDARD DEFINITION TELEVISION |
| **Enhanced Definition TV (EDTV)** -EDTV waa wuxuu ka kooban yahay tilifeeshan Istaandad Dhifinishan ah iyo tilifeeshan analoog ah.EDTV-gu wuxuu ku yimaad qaabka muraay-balaadh (16:19) ama siddii hore (4:3) waxaanu leeyahay 480 xariiq-muuqaal oo kala horeeya.Wuxuu muuqaalkiisu labba jeer ka baan yahay kan SDTV waana qaabka inta badan loo adeegsado DVD-yada | EDTV ENHANCED DEFINITION TELEVISION |
| **High Definition TV (HDTV)** - HDTV-gu wuxuu ku yimaad muraayad-ballaad saamigeeda dhinacyadu yahay (16:9) waxana weeyi qaabka muuqaalkiisu sawirku ugu tayada sareeyo. Wuxuu ka kooban yahay 1080 xariiq muuqaal oo isku dhexjira ama 720 xariiq-muuqaal kala horeeya wuxuuna leeyahay awooda tebinta codka. | HDTV HIGH-DEFINITION TELEVISION |

Wixii macluumaad dheeri ah booqo, **www.dtv.gov/DTV_booklet.pdf**.



*Ku noqo su'aalihii*